Warbixinta gudida arimaha gudaha nabadgalyada iyo difaaca ee golaha wakiilada Jsland.

Araar

Gudidu waxa ay ku saleeyeen warbixintan qodobo si guud u taabanaaya dhamaan nabadgalyada wadanka iyo horumarkiisa,
Iyagoo xaqiiqada dhabta ah ee wadanka ka jirta ka dab qaadanaaya isla markaana ku salaynaaya Dastuurka iyo xeerarka wadanka u dajisan, waxa ay gudidu soo saartay warbixintan hoos ku qoran iyadoo gudidu warbixintan ku soo gunaanaday talooyin ay u soo jeedinayaan sadexda waaxood ee dawladu ka koobantahay 1-W/ sharci dajinta, 2-W/fulinta, 3- W/garsoorka.
Waxa sidoo kale talooyinkan qaarkood ay ku socdaan dhamaan qaybaha kala duwan ee bulshada reer soomaali lan.
Sidoo kale gudidu waxay ku soo afmeerin doonaan warbixintan Baaqyo ay u soo jeedinayaan guud ahaan bulshada caalamka, Dawladaha daneeya nabada ,horumarka iyo dumuquraadiyada ka hanaqaaday Jsland .
Jumciyada quruumaha ka dhexaysa, Hay adaha caalamiga ah iyo kuwa duwaliga ah Ee deeqaha horumarineed ka gaysta Jsland.

1-Aqoonsiga Somaliland iyo dariiqyada loo maraayo

1-gudida arimaha gudaha nabadgalyada iyo difaaca ee golaha wakiiladu iyagoo xilkooda dastuuriga ah gudanaaya waxa ay daraasad ku sameeyeen habka ama dariiqa ugu haboon ee beesha caalamka loogu soo ban-dhigi karo horumarka qaranku ka gaadhay dhinacyada Nabadgalyada,Dhaqaalaha iyo dawladnimada Jsland taas oo aynu uga duulayno sidii qadiyada umada looga midho dhalinlahaa.

2-doorashooyinka madaxtooyada

Gudida arimaha gudaha nabdgalyada iyo difaaca ee golaha wakiilada Sland iyagoo kaduulaaya qodobada dastuuriga ah ee 53aad…… ……. ……

Waxay xil iska saareen sidii golayaasha qaranka iyo dhamaan bulshada reer Sland ay ugu soo bandhigi lahaayeen muhiimada doorashada madaxtooyadu ay dalka u leedahay guud ahaan.iyo waxyeelooyinka ay dalka iyo dadkaba soo gaadhsiisay dib u dhacii ku yimid doorashadii madaxtooyadu.

Dhacdadii golaha wakilada lagu xidhay iyo dilkii muwadiniita mudaharaadka waday

Waxa aynu wada ogsoonayan dhacdadii foosha xumayd ee ka dhacday magaalada Hargeysa ---------- mudaharaadkii muwaadiniintu ay ku muujinayeen dareenkooda ku wajahan ka xumaanshaha xadhigii sharci darada ahaa ee W/A/Gudaha iyo cutubyo ka tirsan ciidamada booliska JSLand kula kaceen golihii wakiilada JSLand----------.
Mudaharaadkaas oo guud ahaan wadanka magaalooyinkiiasa waawayn ka dhacay waxa ay ku wada dhamaadeen nabadgalyo iyo xasilooni marka laga reebo mudaharaadkii caasimada ka dhacay oo ciidamada amanka xoog hubaysan kala hortageen muwaadiniintii mudaharaadaysay,
Taas oo sababtay dhimasho iyo dhaawac soo gaadhay muwaadiniintii mudaharaadka salmiga ah dhigaysay ee dareen kooda muujinaayay,
Waxaana ku geeriyooday rasaasti ay ciidamada amaanku ridayeen 1---------- ---------- ---------- 2 ---------- ---------- ----------. Waxa sidoo kale ku dhaawacmay 1---------- ---------- ---------- 2---------- ----------3---------- ---------- 4 ---------- ---------- .kuwaas oo dhamaantoodba ahaa muwaadiniin dhalinyaro a'h.

Hadaba maaha markii koowaad ee ciidamada aamaanku ay dil ula kaca ah ama rasaas nool ay u adeegsadaan muwaadiniinta Jsland
Waxa ay noqotay arin imbadan ku soo noqnoqotay maskada muwaadiniinta ilaa hadana aan cid damaanad qaadaysa amaankooda la tilmaamikarin maadaama ay

a’haayeen ciidamada amaanka qaranku kuwii loo abuuray ilaalinta amniga iyo nabadgalyada muwaadiniinta.

Waxyeelada siyaasadeed ee falkaasi dilka iyo dhaawaca ahaa uu u gaystay guud a’haan Jsland

Jsland oo ku dadaalaysa in ay ku biirto beesha caalamka kana sugaysa in beesha caalamku aqoonsato madaxbananideeda(dawladnimada) ayay dhacdadani ku noqotay waji gabax siyaasadeed,isla markaana wadamo badan oo si gaara u daneeya jamhuuriyadan iyo ururo badan oo u dooda xuquuqal insaankuba ay hoosta ka xariiqeen in ay wali ku tumanayso xukuumadu xuquuqda dadka ra’yidka ah iyadoo waliba Dastuurka dalkuna sicad u sheegayo xaqa muwaadiniinta iyo xoriyadka dhaqdhaqaaq ee ay ku muujin karaan cabashooyinkooda dadka muwaadiniinta ahi. Hadaba waxa marag madoon ah in wadamadaa iyo ururadaasiba ay dib u liqeen candhuuftoodii calaamd su’aalna ay dul dhigeen ilaa heerka ay xukuumada wadanka ka talisaa tixgalinayso sharciga dalka iyo muwaadiniinteedaba.

Waxa kale oo cad in dhacdadaasi ay wiiqday,dhaawac wayna u gaysatay kalsoonidii guud ahaan bulshada caalamku ka qabtay in ay (Dumoquradiyada) ku dhaqanka nidaamka talo wadaagu yahay mid si buuxda uga hana qaaday Jsland.

Waxa kale oo ay saamayn ku yeelatay dhacdadaasi Hay’adaha jumciyada quruumaha ka dhaxaysa iyo kuwa caalamiga ah ee wadanka joogay shaqooyinkoodii iyo deeqihii ay kaga qayb qaadanayeen wadanka hour marintiisa.
Tusaalena waxaan u soo qaadan karnaa kaalinata ay ugu qiimaysantahay nabdgalyada wadankeenu UN oo ah waxa loo yaqaano (FACE 4),
Sabata dibloogu celin wayay Face 3 ama wax u dhigmana waxa ay noqotay dilaka iyo dhaawacyada ay ciidamada amnigu u gaysanayaan muwaadinininiinta iyo waliba hawlaha amaanka dalka oo ay guud ahaan xukuumadu ku qancin kari laadahay UN iyo hayadaha caalamiga ahba wixii ka dambeeyay tan iyo qaraxyadii oct 2008 dalaka ka dhacayba.
Waxa sidoo kale tusale loo soo qaadan karaa doorashada madaxtooyada ee tirab sadex jeer dib u dhacu ku yimid wakhtigii loogu tala galay in ay qabsoonto.

Soo jeedinta gudida

1 in gudi madax banana oo soo baadha dhacdooyinkaa dilka iyo dhaawacaba lahaa cida geysatay , si maxkamad loo soo hortaago wakhtiga ay suurto gasho.

2-In gudi madax banan goluhu u magacaabo dhacdadii siyaasaded ee wadan ka dhacday, soona baadhaan sababta keentay qaskii siyaasadeed ee khatarta galiyay kala dambayntii iyo nidaamkii dawaldnimo,

3- gudidaasi in ay xaqiiqo raadin ku soo sameeyaan soona baadhaan khasaare naf iyo maalba lahaa ee ay qalalaansihii siyaasadeed guud ahaan dalka iyo dadkaba uu gaadhsiiyay.

4- in ay qiimayn ku soo sameeyaan dhaawaca siyaasadeed ee uu wadanka soo gaadhsiiyay khilaafkii siyaasadeed ee dalka ka dhacay,
A-dhinaca nabadgalyada B-wadamada dariska C-guud ahaan daladaha daneeya jiritaanka Sland D- golaha amaanka E-hayadaha caalamiga ah ee dalka ku sugan.iyo guud ahaanba xidhiidhkii beesha caalamka ay la lahayd Jsland.

5- in gudidu daraasad ku soo samayso khilaafkii siyaasadeed ee wadanka khatarta galiyay waxyaabaha lagag hortagi karo soo noqoshadiisa, isla markaana ay soo bandhigaan waxa lagaga gashaaman karo in uu marlabaad soo noqdo khilaafkii siyaasadeed, iyaga oo kaashanaaya cid kasta oo wax ka qortay ama wax ka diyaarisayba
6- in golaha wakiiladu u aqoonsadaan muwaadiniintii ku dhintay mudaharaadkaa iyo kuwii ku dhaawacmayba geesiyaasha hirgalinta dumuquraadiyada Jsland.

Qaraxii lagu dilay taliyihii qaybta 12aad ee ciidanka qaranka

Sidaynu la wada socono waxa lagu dilay qarax la soo qorsheeyay taliyihii qaybta 12aad ee ciidanka qaranka SLand. Marxuum……..

Soo jeedinta gudiga

1-

Warbixinta hayada Intaranational crisis group

7 dec 2009 waxa ay soo saareen hayadani warbixin xasaasi ah oo ay kaga hadlayaan Sland iyo mustaqbalka dhaw .

Soo jeedinta gudida

1-……
2-……

Nabadgalyada guud ee qaranka iyo warbixinta gobolada dalka.

Gudidu waxa ay si guud qiimayn ugu samaysay xaalada nabadgalyada dalka.
……
……..
Inkasta oo bulshada Sland ay yihiin dad aad u ilaaliya nabadgalyada qaranka , hadana waxa jira falal marar badan abuura nabd galyo daro oo dadka ka dhex dhaca, waxayse ku xaliyaan habkii soo jireenka ahaa ee dhaqanka, tusaale waxxa aynu u so qadan karnaa kiisaska maxkamadaha wadanka ka socda 93% dadwaynahu dibay ugala noqdaan maxkamadaha dacwadaha uga furnaa waxaanay ka door bidaan in ay xal-dhaqameed ku dhamaystaan dacwadahooda, taasna waxa ay in tusaysaa in bulshadu aanay wali ku qancin qaabka iyo nidaamka maxkamadaha wadanku u maamulaan guud ahaan dacwadaha dhibanayaashu ula yimaadaan.
Sidaas darted waxa loo baahan yahay in goluhu dib u eego dhamaan xeerarka ay adeegsadaan garsoorayaasha maxkamadaha dalku iyo qaabka shaqadooda ay u gudanayaanba.
Sidoo kale waxa cad in shaqala'aanta baahsan ee wadanka ka jirta ee inta badan ku dhacad dhalinta wadanka wax u soo baratay ay halis ku tahay guud ahaan amniga wadanka, si hadaba looga hortago khatarta ka dhalan karta xoogaga dhalinyarada dalka wax u soo baratay ee maalin walba soo kordhaaya in goluhu wax iska waydiiyo sidii xal loogu heli lahaa,

Heshiisyada ay xukuumadu la gasho dawladaha aduunka iyo shirkadaha caalamiga ah

gudidu iyadoo waajibaadkeeda gudanaysa kana duulaysa qodobada dastuuriga ah ee……gudidu waxa ay soo ogaatay in ay xukuumadu la gashay heshiisyo qarsoodiya dawl;ada…….

Soo jeedinta gudida

1- in xukuumadu u soo gudbiso dhamaan heshiisyada kor ku xusan sida ugu dhaqsaha badan golaha wakiilada Jsland, si loo waafajiyo sharciyada dhaqangalka heshiisyadaasi, goluhuna uga guto waajibaadkiisa shaqo